



Wasaaradda Macdanta & Tamarta

**War-saxaafadeed ku wajahan Sharciga Patroolka ay ku dhawaaqday
Dawladd Goboleedka Puntland in ay Golaha Barlamaanka horgaynayso.**

Waxaan war-saxaafadeedkan u qabtay, si aan mowqifkayga ka Wasiir ahaan iyo mowqifka Xukuumadda Federaalka KMG ee Soomaaliya ugu caddayno meesha aan ka taaganahay arinta dawlad goboleedka Puntland ay wado.

Waa arin aan la ogolaan karin in Dawlad Goboleedka Puntland oo ah laf-dhabarka Xukuumadda Federaalka KMG ee Soomaaliya ay si bareer ah ugu tacadido xeerka u yaal XFKMG ee Soomaaliya, kaas oo si cad u qeexaya awoodda ay kala leeyihiin Xukuumadda FKMKG iyo Dawlad goboleedyada. Awoodahaas oo sheegaya in khayraadka dabeeciga ah, sida Patroolka, macdanta, iwm ay yihiin hanti qaran masuulna ay shacabka uga tahay Xukuumadda FKMKG ee Soomaaliya; ayna tahay awoodda iyo masuuliyadda XFKMG, in ay u dajiso siyaasad iyo sharci lagu maamulo si looga faa'iideeyo dhammaan shacabka Soomaaliya.

Xeerka Xukuumadda FKMKG ee Soomaaliya, waxaa u qeexaya in la dhawro lana qadariyo sharciyada caalamiga ah iyo heshiisyadii Soomaaliya ay horey ula gashay dawladaha iyo shirkadaha shisheeye. Sidaas awgeed, waa in talaabo kasta oo XFKMG iyo dawlad goboleedyadeedu ay u qaadayaan ka faa'iidaysiga khayraadka dabeeciga ah ee ku jira dhulkooda, aan marna lagu tuman sharciyadaas iyo heshiisyadaas iyaga ah.

Ugu dambayntii, waxaan ka codsanayaa masuuliinta dawlad goboleedka Puntland in ay xushmeeyaan, masuuliyadna iska saaraan dhawrista xeerarka XFKMG ee Soomaaliya oo ay gabi ahaanba joojiyaan ficilada ay wadaan ee ku wajahan sharci u samaynta khayraadka dabeeciga ah, sida Petroolka, macdanta iwm; Ficiladaas oo ka horimaanaya xeerka XFKMG ee Soomaaliya.

Eng. Mohamoud Ali Salah
Wasiirka Wasaaradda Macdanta & Tamarta

Tel: +253 830717 Jabuuti, 20/05/08

